

Hannaanka Shardiga Tallaalka ee Iskoolka Oregon

Tallaalku wuxuu dadka ka badbaadiyaa cudurrada tallaalka looga hortagi karo wuxuuna gacan ka geystaa sidii bulshooyinka had iyo jeer looga dhigi lahaa kuwo ka bedqaba cudurrada dillaaca. Kani waa hannaan loogu talagalay dhaqangelinta shardi cusub oo tallaalka looguna talaagalay ardayda ku jirta xannaanooyinka carruurta iyo iskoollada.

1

OHA wuxuu la tashadaa Iskoolka Tallaalka ee Oregon/Xarunta Carruurta/ Guddiga La-talinta ee Kulliyada Oregon ([ISLAC](#)), oo ah shuraako qaabilsan waxbarashada, caafimaadka iyo waxyaabo kale oo dejiyaan sharuudaha tallaalka iskoollada, xannaanada carruurta iyo kulliyada iyagoo isticmaalaysa sharuudo xirmo ah oo wadajira.

2

OHA wuxuu raacaa Sharciga Habraaca Maamulka markii uu qaadanayo tallaalka cusub oo loogu talagalay iskoolka iyo xannaanooyinka carruurta.

OHA wuxuu sidoo kale u baahan karaa Guddi La-talin oo Sharuucda Qaabilsan oo gaar ah si loo helo talooyin dheeraad ah oo ku saabsan sharuucda qabyo qoraalka ah.

Hannaankan sharci samaynta ahi (si ka duwan sharuucda kumeelgaarka ah) wuxuu ka doonayaa Maamulka Caafimaadka Oregon ee OHA inuu soo helo fikirka dadweynaha ay qabaan kahor intaan la qaadan sharuucda shardiga tallaalka ee kamadambaysta ah.

Dukumiintigaan wuxuu bixiyaa guudmar ku saabsan sharuudaha haatan jira ee tallaalka ee Oregon iyo awoodda lagu bixinayo tallaalka. Waqtiga kamadambaysta ah ee hannaankan lama oga: **Isbaddalka sharci samaynta ah oo kumeelgaar ah ayaa qaadan kara maalmo tiro yar; isbaddalka joogtada ah wuxuu qaataa bilo ilaa sannado.** Dukumiintigaan looguma talagalin inuu muujiyo wixii dookhyo siyaasadeed ah oo ay samayn karto Laanta Fulinta ama Sharciga. Sharuudaha tallaalka ee COVID-19 ee loogu talagalay shaqaalaha iskoollada waxaa loo qaatay sida hoos imaanaysa awoodda kale ee sharciiyeed ee gaarka ah ee laga soo qaatay sharuucda uga baahan carruurta iyo ardayda in la tallaalo.